

Nala soo xiriir

Xarunta Markfield ayaa Haringey ka bixisa Adeegga Macluumaadka, Talosiinta iyo Taageerada Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah iyo Nafooyinka (Special Educational Needs and Disabilities Information, Advice and Support Service) (SEND IASS). Waxa aan annagu macluumaad, talo iyo taageero aanan eexasho lahayn ugu deeqnaa dhallinyarada iyo waalidiinta/daryeeleyaasha carruurta qabta Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah iyo Nafooyinka.



Soo wac Khadkayaga caawinta si aad u hesho talo bilaash ah

020 8802 2611 (xilli-dugsiyedka oo keliya)

Isniinta 9:30 subaxnimo ilaa 1:00 galabnimo
Arbacada 3:30 galabnimo ilaa 7:00 fiidnimo
Khamiista 2:30 galabnimo ilaa 6:00 fiidnimo

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama si aad kulan u diyaarsato

Soo wac xarunta Markfield: **020 3667 5233**

Iimayl: familyadmin@markfield.org.uk

Booqo bartayada internetka:

www.markfield.org.uk/sendiass

Lambarka Diiwaangelinta Hay'adda samafalka ah: 289904

Sida aad noo helayso




Cinwaanka xarunta Markfield:
Markfield Park
Markfield Road
London
N15 4RB

Tareenka hoosta mara ee Ugu dhow:
Seven Sisters, Tottenham Hale
www.markfield.org.uk



**Miyuu ilmahaagu u baahan
yahay taageero waxbarasho
oo dheeraad ah?**

**Adeegga Macluumaadka,
Talosiinta iyo Taageerada
Bilaashka ah**



"Iminka oo aan fahmay nidaamka, waxa aan dareensan ahay in aan awood dheeraad ah u leeyahay in aan ilmahayga taageero" Waalid

**Adeegga Macluumaadka, Talosiinta iyo Taageerada
Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah iyo
Nafooyinka ee Haringey**

Cidda aan annagu nahay

Adeegga Macluumaadka, Talosiinta iyo Taageerada Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah iyo Naafooyinka (Special Educational Needs and Disabilities Information, Advice and Support Service) (SEND IASS) ee Haringey waxaa bixisa xarunta Markfield, xarun bulsheed oo isku jirta oo lagu abaabulo xuquuqda, sinnaanta iyo madaxbannaanida dadka naafaysan.

Waxa aan annagu ku deeqnaa adeeg bilaash ah, aanan eexasho lahayn oo qarsoodi ah:

- **Taageero** laga bixiyo tagidda kulannada, qayb ku yeelashada qiimaynada iyo dib u eegisyada iyo ka qayb qaadashada go'aannada ku saabsan natiijooyinka khuseeya ilmaha ama qofka yar.
- **Ku toosinta ama u tilmaamidda** carruurta, dhallinyarada, waalidiinta adeegyada taageerada dheeraadka ah marka loo baahdo, xataa taageero laga bixiyo isku diyaarinta qaangaarka, sida guuritaanka, habaynta nolosha iyo taageerada shaqada.
- **Gargaar** la bixiyo marka ay xaaladdu qaldanto, xataa taageero laga bixiyo diyaarinta ama tagidda kulannada xallinta hore ee muranka.
- **Taageero** laga bixiyo isku dabbaridda dhedhexaadinta, rafcaannada loo diro Maxkamadda gaarka ah ee Darajada koowaad (First-tier Tribunal) ee Baahiyaha Waxbarashada Gaarka ah iyo Naafooyinka (Special Educational Needs and Disabilities) (SEND), ka saarista dugsiga, iyo cabashooyinka ku saabsan arrimaha la xiriira baahiyaha SEN iyo Naafada.

Adeeggan waxaa maalgeliya Kawnsalka Haringey (Haringey Council) waxaana bixisa xarunta Markfield. Fadlan barta internetka ka eeg siyaasaddayada ku toosan eexasho la'aanta.

Adeegyadayada

Kulannada talosiinta

Ballamo fool-ka-fool ah oo loogu talagalay waalidiinta iyo dhallinyarada si loogala hadlo walaacyada jira, loogu diyaargareeyo kulannada sida Dib u eegisyada Sanadkii, loogu buuxiyo foomamka ama codsashooyinka, loogu qoro waraaqaha, oo loola wadaago macluumaadka ku saabsan adeegyada kale. Kulannada waxaa lagu qabtaa xarunta Markfield iyo dhowr dugsi iyo xarumo carruur oo ku yaalla Haringey.

“Waxaa annaga noo suurtogashay in aan ka warranno dhacdooyinka na soo maray oo aan dhiibanno fikradahayaga gaarka ah. Wax fiican ayay ahayd maxaa yeelay anigu badi si furan wax uma sheegto oo ma dhiibto fikradahayga.”

Qof Yar

Ka qayb gal

Waxa aan annagu xilli-dugsiyeed kaste qabannaa kulanno kooxeed ee tixraac ee adeegga SENDIASS oo loogu talagalay waalidiinta iyo xirfadleyaasha. Labada kooxood waxa ay taageeraan adeegga iyaga oo ka dhiibta fikrado, eega hababka lagu shaqeeyo waxa ayna gargaar ka bixiyaan wanaajinta joogtada ah. Haddii aad rabto in aad timaaddo taariikhaha kulanka xiga iyo macluumaadka xiriirka waxaa laga heli karaa barta internetka adeegga SENDIASS.

Taageerada dheeraadka ah

Mararka qaar waxa ay qoysasku geli karaan duruufo aad u adag tusaale ahaan carruurta ama dhallinyarada oo dugsiga laga saaray, markaa uun cudur lagu sheegay, ama daryeeleyaasha laftigooda oo naaf qaba. Mararkan waxa aan isku wadnaa in aan qoondayno ama bixinno Hawlwadeen Talosiin (Advice Worker) oo magacaaban oo ku deeqi kara taageero fool-ka-fool ah.

Hoosooyinka ama kulannada tababbarka

Waxa aan annagu bixinnaa tababbar joogto ah oo ku saabsan nidaamka SEND iyo xeerasha khuseeya dugsi ka saarista. Tababbarku waa u bilaash daryeeleyaasha iyo dhallinyarada.

Mutaddawiciinta adeegga SEND IASS

Mutaddawiciintayadu waxa ay khibrad u leeyihiin nidaamka SEND waxaana loo tababbaray in ay taageero waalidiinta iyo dhallinyarada ka siyyaan isku diyaarinta iyo tagidda kulannada.

Lataliyeyaasha Dhallinyarada ah ee Madaxbannaan

Kooxdayada hoggaaminta ee mutaddawiciinta dhallinyarada waxaa laga keenaa dugsiyada dhexe ee Haringey, waa la tababbaraa waana la taageeraa si loo hubyo in codka dhallinyarada qabta baahiyaha SEND uu bartamaha ugu jiro adeeggayaga.

“Naadiga Qoysku waa meel ay si nabad ah carruurtu ugu ciyaari karaan. Way fiican tahay in lala kulmo waalidiinta kale oo macluumaadka la wadaago” Waalid

Naadiga qoyska

Kulan ballan la'aan ah oo bishii lagu qabto xarunta Markfield halkaas oo ay carruurta, dhallinyarada iyo waalidiinta/daryeeleyaashu kula kulmi karaan qoysas kale, wadajir ugu qaadaan karaan maalin dibad bax ah oo xiise leh, oo ay ku heli karaan talada shaqaalaha adeegga SEND IASS.